

Shuruudaha deynsashada

Shuruudaha deynsashada ee ku xidhan qofka deynsanaya qalabka hawl fududeynta

Waxaa aan rajeynaeynaa in aad ka hesho waxyaabo badan oo faa'iido badan kuu leh qalabka hawl fududeynta ee aad deynsatey. Qalabka hawl fududetu waa kuwo si gaar ah loo tijaabiyey isla markaana si gaar ah ugu haboon baahidaada. Lama ogolo in aad sii deymiso ama siiso cid kale. Qalabka aad deynsatey waxaa uu ka diiwaan gashanyahay rugta daryeelka caafimaadka ee aad ka tirsantahay. Waxaa qalabkan kuu qorey qof shaqeeyaha hay'adaha daryeelka caafimaadka kaas oo qiimeyn ku sameeyey in aad baahida u qabto qalabka, isla qofkaas ayaa tijaabiyey isla markaana la socon doona in qalabku siddii la rabey u sahqeynayo iyo in kale.

Hay'ada daryeelka caafimaadku waxaa ay xaq u leedahay in ay la socoto isla markaana sameeyaan qiimeyn cusub oo ku saabsan baahida loo qabo qalabkaas, tusaale ahaan haddii xaaladaada caafimaad ama xaaladaada xagga degaanka ay is bedesho, haddii aad qalabka u isticmaali weydo siddii loogu talo galey ee ku xusan tilmaamaha ama sharciyada khuseeya ay is bedelaan. Qiimeynta la samayn doona waxaa ay horseedi kartaa in qofkii kuu qorey qalabka uu kaa bedelo qalabka hawl fududeynta ama in dib loo soo celiyo.

Isticmaalka iyo tilmaamaha

Si qalabka hawl fududeyntu ugu shaqeeyo si fiican waxaa haboon in aad u isticmaasho, u nadiifiso isla markaana u dhowrto sida ku xusan buugga isticmaalka iyo tilmaamaha shaqsiyadeed ee qofka kuu qorey ku siiyey. Lama ogola in aad ku sameyso wax dayactir ah, aad ku rakibto qaybo kale oo adiga kuu gaar ah ama raad ku yeelan kara qalabka aad deynsatey.

Haddii qalabka hawl fududeyntu u baahdo dayactiro

Fadlan la xidhiidh xarunta dhexe ee dayactirka qalabka hawl fududeynta ama cida kale ee lala xidhiidhayo ee hoos ku xusan. Fadlan ha isticmaalin qalabka hawl fududeynta haddii aad u maleyneyso ama aad aaminsantahay in cilada ku jirta ay saameyn ku yeelan karto amaankaaga.

Haddii uu jiro qorshe ah in aad guurto ama aad u baxeyso safar qaadan doona muddo dheer Fadlan la xidhiidh cida lala xidhiidhayo ee hoos ku xusan si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida ay uu suurogal u tahay in lala guuri karo qalabka hawl fududeynta ama sahraciyaada khuseeya haddii safar lagu maqnaanayo muddo dheer.

Adiga ayaa iskaa u iibsanaya:

- Ashyaada la isticmaalo ee suuqyada caadiga ah laga iibsano karo, sida tusaale ahaan beytariyada iyo nalalka ama laambadaha.
- Kharashyada shidaalka, sida tusaale ahaan lacagta korontada
- Gaadiidka lagu qaado qalabka hawl fududeynta muddada lagu hasto daynta
- Dayactirka muddada lagu suganyahay wadanka dibadiisa.

Goorma ayaa soo celin doontaa qalabka hawl fududeynta

Waa in aad u soo celisaa qalabka hawl fududeynta oo aad nadiifisey isla markaana dhan sida ugu dhakhisa badan ee aad uga maaranto isticmaalkiisa ama lagaaga codsado in aad dib u soo celiso. Fadlan la xidhiidh xarunta dhexe ee dayactirka qalabka hawl fududeynta ama cida kale ee lala xidhiidhayo ee hoos ku xusan si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida aad u soo celineyso iyo goobta aad ku soo celineyso qalabka hawl fududeynta.

Waxaa dhici karta in la bixiso magdhow haddii:

- aan la adeegsan qalabka hawl fududeynta, aan la dayac-tirin isla markaana aan loo nadiifin sida ku xusan buugga isticmaalka
- uu ku yimaado qalabka dhaawac loo arko in uusan ku iman si dabiici ah
- uu lumo qalabku dayac daro aawadeed
- aan dib loo soo celi qalabka marka lagaa codsado in aad dib ugu soo celiso cidii ku siisey
- uu ku yimaado qalabka isbedel ay keentey sababo la xidhiidha sawiro ama rabadho lagu dhijiyey, ranji la mariyo ama in lagu xidho qabatooyin iyo wax la mid ah.

Waxaa lagu-gula talinayaa in aad dib u eegis ku sameyso caymiskaaga.

Haddii aad qabto wax su'aal ah ama haddii uu qalabka hawl fududeynta la soo darso wax dhib ah ama shil ah, fadlan la xidhiidh sida hoos ku xusan:

La xidhiidh: